AGENTSCHAP
INTEGRATIE &
INBURGERING

COVID-19 | Maatregelen | 30/12/2020

Somali | Vertaald uit het Nederlands

Talaabooyinka 30 Diseembar

Hordhac

Dawladdu waxay leedahay xeerar si ay fayraska Koronaha u joojiso. Xushmee xeerarka. Haddii aad sidaas yeesho xanuunku kugu dhici maayo qof kalena ku ridi maysid. Bilayska ayaa ku kantarooli kara.

Fiiro gaar ah: Magaalooyinka iyo degmooyinka qaarkood waxay leeyihiin xeerar dheeri ah. Hubi bogga interneetka ee magaaladaada ama degmadaada.

xeerarka dahabi ah

- Marar badan gacmahaaga ku dhaq biyo iyo saabuun.
- Xiro maaskaro afka ah
- Ka fogow ugu yaraan 1.5 mitir dadka kale.
- Xiriir kaaga dhaw ku xaddid ugu badnaan 1 qof. Qofka xiriirkaaga dhaw ah 1.5 mitir In aad ka fogaato looma baahna.
- Fiiro dheeri ah u yeelo bukaanada nugul (halista ku jira):
  - dadka da'doodu ka wayntahay 65 sano.
  - dadka wadnaha, sambabada ama kalyaha dhibaato ka haysato
  - dadka infekshanka degdeg u qaada.
- Ku shaqee guriga.
- Si fiican u layri guriga: daaqadaha fur.
- Waxa fiican in aad dadka dibadda kula balanto.

In magaalo kale ama dal kale la aado

- Beljamka gudihiisa:
  - Si xor ah ayaad ugu dhax safri kartaa.
  - Ma isticmaashaa gaadiidka dadweynaha (bas, taraam ama tareen)? Ma ka wayntahay 12 sano? Waa in aad xirato mar kaas maaskaro afka ama shaal aad ku daboosho afka iyo sanka. Taas waa waajib.
  - Laguuma ogola inaad banaanka u baxdo inta u dhexeysa 24 saac ama 12-ka saqda dhexe iyo 5ta subaxnimo (6 saac saqda dhexe iyo 11 saac subaxnimo.
- Dalka dibaddiisa in aad aaddo:
  - Waxa fiican inaadan dibadda u safrin. Tani waa waano.
  - Ma ku qasbantahay inaad wali u safarto wadamo kale? Waxaa jira 3 nooc oo aagag ah.

    - Waxaad u safri kartaa aagagga cagaaran. Taasi waa amaan.
    - Waxa fiican inaadan u safrin aagagga casaanka ama liimiga.
    - Ka fiirso bogga internetka ee Wasaaradda Arimaha Dibadda: diplomatie.belgium.be.
  - Wadan kasta xeerar u gaar ah ayuu yeelan karaa. Xeerarka ka fiirso: https://diplomatie.belgium.be/nl/Diensten/Op_reis_in_het_buitenland/reisadviezen
  - Ma soo joogtay in ka badan 48 saac dalka dibaddiisa ? Waa qasab inaad xaqiijiso in aad 3 dan shay samayso mar ka aad ku soo laabato Beljamka:

1. Waxa aad buux-buuxinaysaa warqadan (formulier) https://travel.info-coronavirus.be/nl/public-health-passenger-locator-form.
2. Ma laguu soo diray fariin sms ah ? Waa qasab in aad karantiil gasho. Waxa qasab ah inaad guriga joogto ugu yaraan 7 maalmood. Waxaad mari doontaa baaritaanka corona maalinta 1aad iyo maalinta 7aad. Malaguu soo diri waayay fariin qoraal sms ah? Qasab maaha in aad karantiil gasho.
3. Ma waxaad ka timid aag cas? Markaa karantiil iyo baaritaanka corona marwalba waa qasab. Waa inaad guriga joogtaa ugu yaraan 7 maalmood. Waxaad mari doontaa baaritaanka corona maalinta 1aad iyo maalinta 7aad.

- Ma deganid Beljamka oo ma imanaysaa Beljamka? Markaa waa inaad sameysaa baaritaanka corona 72 saacadood ka hor intaadan imaan Beljamka. Natiijadu waa inay noqotaa in lagaa waayay.

Shaqo

- Ku shaqee guriga. Tani waa qasab.
- Mase ku qasbantahay in aad shaqo aaddo?
  - Waa inaad xirataa maaskaro afka ah.
  - Si fiican u layri: daaqadaha fur.
- Su'aalo ma qabtaa? Waxa macluumaad ku siindoona maamulahaaga.

Dukaammada

- Dhammaan dukaamadu way furan yihiin.
  - adeego kalidaa.
  - Waa laguu oggol yahay inaad dukaanka la aaddo carruurta ka yar 18 sano. Tan samee sida ugu yar ee suurtogalka ah.
  - Ma gelaysaa dukaanka? Marka hore, jeermiska ka dil gacmahaaga.
  - Waxaad adeegan kartaa ugu badnaan 30 daqiiqo.
  - Xiro maaskaro afka ah. Tani waa qasab.
- Waxaa jira suuq. Suuqyada alaabada la isticmaalay, suuqyada jiilaalka iyo suuqyada kirismaska lama oggola.
- Dukaanka habeenkii shaqeeya waxa uu furan yahay ilaa 22 saac (10ka habeenkii ama 4 saac habeenimo).
- Lama oggola inaad khamro iibsato wixii ka dambeeya 20 ka saac (8da fiidnimo ama 2 saac fiidnimo).
- Timo-jaraha ama goobaha qurxinta gaarka way xiran yihiin.

Hoteellada, maqaaxiyaha iyo kafateeriaydaha

- Kafateeriayadaha iyo maqaaxiyaha waa la xiray.
- Cunto waad ka soo qaadan kartaa ilaa iyo 22ka saac (10ka habeennimo ama 4 saac habeennimo).

Xiriirka bulshada

- Waxaad xiriir dhow la yeelan kartaa ugu badnaan 1 qof oo isla isaga ah. Markaa in aad kala fogaataan 1.5 mitir looma baahna.
- Waxaad gurigaaga ku martiqaadi kartaa qoyskiiba ugu badnaan 1ka qof ee xiirriir kaaga dhaw ah.
- Kalidaa ma nooshahay ? Waxaad gurigaaga ku martiqaadi kartaa qofka xiriirkaga dhaw ah iyo hal qof oo dheeri ah. Shaqsiyaadkan lama ogola in ay isku mar gurigaaga joogaan.
- Banaanka waxaad ku joogi kartaan ugu badnaan 4 qof. Waa inaad ilaalisaa kala fogaanshaha masaafo ee 1.5 mitir. Caruurta ka yar 12 sano tirada kuma jiraan.

Maalmaha ciidaha

- sRashku waa mamnuuc.

Dhaqdhaqaaqa

- Waad ku jimincsan kartaa banaanka, ugu badnaan 4 qof ayaad la jimicsan kartaa.
- Naadiyada isboortiga, xarumaha fayo-dhowrka iyo xaruma jimicsigu way xiranyihiin.
- Barkadaha dabbaashu way furan yihiin.

Waqtiyada firaaqada

- Wax walba way xiran yihiin. Tusaale shaneemooyinka, goobaha kkamaar-ka, jardiinooyinka madadaa-lada iyo xadiiqooyinka.
- Maktabadaha ayaa wali furan.
- Meelaha lagu ciyaaro ee banaanku way furan yihiin.
- Matxafyadu way furan yihiin.

Diinta

- Adeegyada cibaadada waxaa loo oggol yahay ugu badnaan 15 qof. Carruurta ka yar 12 sano iyo adeeg-gaha cibaadada (tusaale ahaan wadaad ama imaam) tirada kuma jiraan.
- Aasaska iyo aroosyadaka waxa loo oggol yahay ugu badnaan 15 qof. Carruurta ka yar 12 sano iyo diiwaan-hayaha arimaha bulshada ama adeeggaha cibaadada (tusaale ahaan wadaad ama imaam) tirada kuma jiraan. Cunno ma jirto munaasabadda ka dib.

Xanaanooyinka (Crèches) iyo Iskoolka

- Xanaanooyinka (crèches) way furan yihiin.
- Ardaydu waxay aadi karaan iskoolka. Iskoolkaaga ayaa macluumaad dheeri ku siin doona.

Dhiirigelin

Xeerarkan waxa ay muhiim u yihiin caafimaadka qof kasta. Qofkasta waxa laga rabaa in uu xushmeeyo.

Inaad sidaa yeesho waad ku mahadsantahay. Si wada jir ah ayaan fayraska Corona-ha u joojinaynaa.